



## Ardayda Baraneysa Afka Ingiriiska: Xuquuqdaada Sinnaanta ee Waxbarashada

English Language Learners: Your Right to Equal Education

Ardayda barata afka ingiriiska ee loo yaqaanno *English Language Learners, ELL*, ama, *English as a Second Language, ESL*, waxay xaq u leeyihiin in ay ku helaan iskuulka fursado waxbarasho oo la mid ah kuwa ay helaan ardayda kale. Taas macnaheedu waa in ay jiraan sharciyo ku aaddan sida ay iskuuladu u caawin doonaan ardaydaas si ay guul uga gaaraan waxbarashadooda.

### Sidee bay iskuulladu u caawin karaan ardayda aan ku hadlin Ingriiska?

Iskuul kasta waa in uu:

- aqoonsado ardayda u baahan barashda afka Ingriiska.
- leeyahay barnaamij *ELL* ah, oo ay waxbarashadiisu aad u sarreyso.
- haysto shaqaale tababaran oo waxbari kara ardayda *ELL*.
- qiimeyn isku sameeyo oo uu is baddel u sammeyn karo ardayda liidata.
- ardayda ku caawiyo in ay bartaan afka Ingriiska **iyo** in ay gaaraan heerkii laga filayey.



### Waa maxay mas'uuliyada iskuulka ee ku wajahan waalidiinta?

Iskuul kasta waa in uu:

- diyaarsado sida uu ula xiriiri karo waalidiinta- oo uu afafkooda kula hadlo, iyo in ay waalidiintu ka qeybqaataan waxbarashada carruurtooda.
- waalidiinta 10 casho gudahood kula socodsiiyo ka dib marka ilmhooda lagu daro barnaamijka *ELL*.
- faahfaahin ka bixiyo adeegyada iyo hadafka ku aaddan barnaamijyada waxbarashada ardayda. Iskuulladu waa in ay waalidiinta la socodsiiyaan in ay xaq u leeyihiin- oo ay diidi karaan, waxbarashada loo hayo carruurtooda.
- waalidiinta la socodsiiyo haddii ay carruurtoodu gaari waydo hadafka ama yoolka waxbarashada *ELL* ee laga filayo sannad kasta.

## Waxa aysan iskuulladu sameyn karin

- Iskuul kasta inta badan maalintii oo dhan ma kala saari karo ardayda *ELL* iyo ardayda kale.
- Iskuul kasta ardayda ku jirta *ELL* uma diidi karo barnaamijyo horumar u noqon kara, ama galaasyada loo qaato u-diyaargarowga kuleejyada.
- Iskuulladu si joogto ah ardayda *ELL* uguma kala saari karo xirfado hoose iyo kuwo lagu xoogsado.



*Qoraalkan waxaa la soo saaray kolkii wada-shaqeyn lala sameeyey Mashruuca Barashada Sharciga ee Xafiiska Adeegga Sharciga ee loo yaqaanno Southern Minnesota Regional Legal Services Education Law Project.*

**Warqadaha xogtu waa xog sharci ee ma'aha talo qareen. Arag qareen haddii aad talo rabto. Ha isticmaalin warqadan xogta haddii ay ka weyntahay 1 sano. Nasoo waydii xog wixii cusub, warqado xogta, ama xog sikale u dhigan.**

© 2019 Minnesota Legal Services Coalition. **Dukumintigaan waa la badan karaa, loona isticmaali kara wixi aan ahayn ganacsi sida arimo shaqsi iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda qoraalkan waa la illaliyay. Waa in ogaysiiskani ku qornaadaa koobi kasta oo laga saaro. In loo koobiyeeyo, ama loo isticmaalo arimo ganacsi waa mamnuuc.**